

HA LA JOOJIYO BAADDA

QOFNA MA ASTAAHILO
IN LA BAADO

Willkaaga dugsigaa lagu caayaa. Gabadhaada waxay kuu shegtey inaysan saaxiibbo lahayn oo caruurta kalena aysan ayada la cayaareynin. Aflagaado

Dhaqankan mahaa mid ku lug-leh korriimada – waa baad. Baaddana waa in la joojiyaa.

Wa maxay baadda?

Baaddu waa gef bareera oo qof lagu maagayo ahna dhaqan meelka dhac oo la caadeysto in mudda ah. Waxayna dhacdaa marka uu qof, qofkale uu u awod uu sheegto.

Siyaabaha qaarkood ay caruurta iyo dhallinyaradu u baadan kuwa kale waa: u bixin magacyo aflagaado ah, ama in wax xun laga sheego ama laga qoro, fagaaroyinka lagu inkiro amaba aan lala hadlin, la handado ama sharafta laga qaado ama loo cagajugleeyo, laga xado ama laga jebebiyo qalabkooda, la feero ama la laado ama lagu qasbo inay sameyaan wax aysan raali ka ahayn.

Dhallinyarada qarkeed mobaylka ayey ku baaddan caruurta kale. Baadu waxay noqon karaan sawirro, farriin fiidiyo ah, telefoon ama qoraallo (TXT) oo lagu handdadaayo qofka loo dirayo ama dhogorta ka qaadeyso.

Way ku adagtahay in ilmaha ama dhallinyarada la baadayo uu isdifaacaan. Adiga caawimo kaaga baahanyihiin.

Baaddu looma dulqadanayo.

Qofna ma astaahilo inuu waxaan uu u dulqaato.

Maxaa baadda ka dhigay wax xun?

Baaddu waxay ka horistagaysaa caruurta iyo dhallinyarada inay ku abaabaan nolol caadi ah oo farxad leh.

Waxay dareemi karaan cidlo, murugo, cabsi, ammaandarro iyo in baadda lagu sameeyo ay iyaga isuu keenen (masuul ka yihiin).

Astaamaha lagu garan karo in cunugaaga la baado waxaa kamid noqon kara calool xanuun, qarwo, ka cagajido inuu dugsiga aado iyo kalsooni xumo. Waxaa dhici karta in ay Cidloodan ama inay ka go'aan saaxibaddooda iyo qaraabaddooda. Waxaa badanaaba ku adkaata inay xoogsaarana daraasadda dugsiga.

Maxay tahay sababta ah in caruurta iyo dhallinyarada qarkeed loo baado?

Caruurta ama dhallinyarada wax baada waxay raadsadaan caruurta ama dhallinyarada ay u maleeyaan inay ka xoogbadayhiin iyo inaysan wax iska celin karin.

Waxaa badanaaba dhacda in dhibbanuhu uu yahay qof si uun uga duwan, tusaale waxaa ah midabka, lahdajiisa, heerka sare ee aqoonta, magacyadooda ama qaabkooda iyo joogooda.

Marna dhibbanaha masuul kama aha dambiga baadda.

Qofna ma astaahilo in la baado.

Maxaan samayn karaa haddii cunugayga uu yahay mid la baado?

- ① Dhagayso oo rumayso waxa ay ku sheegayaan oo u hiilli.
- ① Markay wax kuu sheegtaan u mahad celi kulana tali inay baadda lagu hayo ay u sheegaan qof ay aaminayaan.
- ① Ka dhaadhici inaysan ayaga dembiga galin.
- ① Kala hadal siyaabaha dhibaata lagu xallinayo, sida in laga fogaado caruurta wax baadda iyo in saaxiiboo cusub la samaysto.
- ① Ku dhirrigali uguna hambalyay waxyaabaha ay ku fiicanyihiin si aad uga caawisid inay kasoonida ugu soo noqoto. Cunug isku kalsoon ma noqonayo mid si fudud lagu baado.
- ① Ka caawi inay ku kalsoonyihiin cidda ay yihiin iyo sida uu muqaalkooda yahay.
- ① Ku raalligali inaad waxba aadan samaynaynin adiga oo marka hore ayaga la tashan.
- ① Kala hadal arrimaha ku saabsan cunugaaga dugsiga uu dhigto, Dugsiga weydii waxa ay ka qabanayaan arrinta baadda.
- ① Dugsiga uu cunuggu dhigto ku dhiirgeli in ay soo saaran xeer ka hortagaaya baadda 'no bully policy'
- ① Kula tali in uu dugsiga hirgaliyo barnaamijka Boliiska ee looga hortagayo baadda lana yiraahdo 'Kia Kaha'.

Xusuuso: Inaan lagugu la talineynin in aad qofka wax baadaya in aad la xirirtid ama aad waalidkooda laxixirtid fikrad ahaan ma qumana in aad adiga la xiriira la samaysid cunuga ama qofka dhallinyarada ah ee wax baada ama reerkooda. Waxaad arrinkan uu mareysa dugsiga in uu wax ka qabto. Haddii arrinku uu yahay mid culus oo dugsiga dibaddisa ka dhaca, markaa la xiriir Boliiska kuugu dhow.

QOFNA LAGAMA FILAAYO WAXAAN INUU U DULQAATO



Telecom

Maxaan sameyaa haddii aan ka warhelo in cunugayga mobaylka lagu baado?

Waxa soo socdaa cunugaaga xasuusi:

- ① Waligood yaysan siinin telefoon lambarkooda qof ay muddo yar isyaqaanaan, siiba internetka.
- ① Haddii ay farrin ka helaan lambar aysan macriifo u lahayn waa inay iska illoobaan.
- ① Haddii ay helaan farriin nooc kasta oo wax u dhimaysa, yaysan ka jawaabin. Inta badan kuwa wax baada way raadineyaan sidii ay ku daandaansanilahayeen.
- ① Wax tala ah, la xiriir NetSafe oo laga helo 0508 NETSAFE (0508 638 723) ama email ugu dir queries@netsafe.org.nz
- ① Haddii uu mobaylka boos ka bannaanyahay farriimaha laguu soo diro dhan ha tirtirin – haddii kalena, meel ku xafido fariinta, saacadda iyo taariikhda laguu soo direy. Markhaatigan waxay qiimo yeelan kartaa haddii arrinku uu faraha ka baxo.
- ① La hadal shirkadda mobaylka ee cunugaaga; waxaa dhici karta inay digniin ay ugu diraan qofka mobaylka ama xita ay ka xayiraan in uu khadkooda isticmaalo. Macamiisha Telecom waxay telefoonkaaga galin karaan *123 qaybta khaaska ee farsamadaas howlgalisa. Tan ayaad samayn kartaa ama weydiiso in lambar kale oo cusub laguugu bedalo.
- ① Haddii cunugaaga iyo adiga aad Telecom ku xirantihin, waxaad Telecom weydiisan kartaan in ay baaran baadda mobilka ama telefoonka, Telecom kala xiriir lambarkan 0800 809 806 (Isniinta ilaa Jimcaha 9 subaxnimo – 4 galabnimo).
- ① Waxaa laga yaaba in dhibaataadaas loo gudbiyo Boliiska haddii shakhsiga wax baada u ku kaco falal halis ama dhibaatooyin waxyeela maalin-nolo leedkaaga.

BAADDU WAX LOO DULQAADAN KARO MA'AHA

Maxaa caruurta iyo dhallinyarada qaarkeed ku kallifa inay wax baadaan?

Caruurta iyo dhallinyarada waxay baaddu u samayn karaan in ay is-tus-tusan, in ay isuu muujiyan inay yihiin dad adadag, in la isuu tilmaamo ama in ay inta kale

ISKA HUBI LAFAHAANTADA
INAADAN WELIGAA
CARUURTAADA AADAN
U CAGAJUGLAYNIN

cabsigaliyaan. Waxaa dhici karta in ayaga laftigooda la baado. Waxaa dhici karta xita inaysan war u haynin in waxa ay samaynayaan ay qalad yihiin iyo dareenka uu ku leeyahay kuwa loo geysto baada.

Caruurta iyo dhallinyarada wax baada waa laga caawin karaa inay baddalaan dabcigooda.

Maxaa sameyaa haddii aan ogaado in cunugayga uu baado caruur kale?

Cunugaaga ka dhaadhici in baaddu ay tahay fal qaldan ayna meelkadhad ku tahay qofka la baadayo. Waydii waxa ay isaga uu samayn lahaa haddii uu qof kale isaga baado. Kala hadal sida ay caruurta kale ay si nabad ula joogaan iyadoo ayaga aan la baadin. Ka faraxsii marka aad oogatid sida wanaagsan oo ay ula ciyaaraan caruurta kale. La hadal hawlweedena dugsiga si aad ku ogaatid haddii ay jiraan barnaamijyo loo saameyay caruurta iyo dhallinyarada wax baada, ama haddii lataliyaha dugsiga uu caawin karo.

Cunugaaga u sheeg inusaan ka qaybqaadan meel cunug ama dhallinyaro kale lagu baadayo iyo inay markasta iskudayo inuu caawiyo qofka la baadayo. Haddii aysan arrinkaa wax ka qaban taasi waxaa loo qaadanayaa inay baaddu tahay wax CAADI AH

BAADDU WAA DABEECAD AAN LOO DULQAADAN KARIN

WARAR DHEERAAD EE KU SAABSAN BAADDA & BARNIMIJKA BOLIISKA EE KIA KAHA...

Booqo shabakadda www.nobully.org.nz ama cawimaadda qadka telefoonka ee lacag la'aanta ah ee 0800 NO BULLY (0800 66 28 55)

Waxaad kaloo warar waxtar leh ka helayaa internetka: www.telecom.co.nz/mobilebullying iyo www.netsafe.org.nz Dhallinyarada New Zealand waxay kaloo wici karaan 'What's Up' oo laga helayo caawimo iyo waano lambarkana yahay 0800 942 8787

Maqaalkan waxaa kuu soo diyaariyay New Zealand Police Youth Education Service iyo Telecom.

BAADDU
LOOMA
DULQAADAN
KARO

BAADDU MA'AHA
QALAD UU
GALABSADAY
DHIIBANAHA



Telecom